

Nuxurka Guud

Saamaynta Faafida Covid-19 ee qaxootiga iyo ilaalintooda ee wadamada Kenya, Uganda, Ghana, Nigeria, Koonfur Africa iyo Zimbabwe

Faafida Caabuqa-19 ee hadda jirta waxay saamaysay dhammaan dadka dunida oo dhan laakiin kuwa ku sugan goobaha nugul, oo ay ku jiraan qaxootiga iyo dadka barakacayaasha, ayaa laga yaabaa inay la wajahaan khataro waaweyn. Daraasad dhawaan la sameeyay, waxaan sahminay sida halista Caabuqa-19 uu u saameyay qaxootiga iyo ilaalinta qaxootiga lix waddan oo ku yaal Galbeedka Afrika, Bariga Afrika iyo Koonfurta Afrika, kuwaas oo kala ah Ghana, Kenya, Nigeria, koonfur Africa, Uganda, iyo Zimbabwe, intii lagu jiray sanadkii ugu horeeyay ee safmarka iyo ilaa iyo Febraayo 2021. Anagoo isticmaaleyno xog-uruurinta aanan la matalin, waxaan raadineynay inaan helno afkaar ku aadan aragtida dadka asal ahaan kasoo jeeda qaxootiga, aqoonyananada, saraakiisha dowladda iyo howl wadeenada gargaarka ee la shaqeeya iyo qaxootiga. Isu geyn 90 jawaab celiyayaal ah ayaa buuxiyey xog-uruurinta.

Jawaabaha la bixiyay waxaa ku cad in xaalada ay ku suganyihiin qaxootiga iyo dadka barakacayashaha ah iyo wadamada marti galiyo ay aheed mid aad u adag kahor safmarka. Caabuqa karoona ayaa kor usii qaaday caqabadaahan, qeyb ahaana abuuray qataro cusub. **Ka qeyb qaatayaasha ayaa ku nuux nuuxsaday in dhibaayootinka dhaqaale, hab nololeedka xadidan, helitaan la'aanta adeegyada caafimadka iyo khatarta amniga ay kamid yihiin caqabadaha soo shaax baxay caabuqa Caabuqa-19 dartiis.**

In kastoo horumarka dowladaha iyo jawaabha dowladaha ka bixiyen safmarka ay kala duwanyihiin hadana ka qeyb qaatayaasha waxay ka hadleen saameyn isku mid ah. **Talaabooyinka dowladaha sida xiritaanka xuduudaha iyo soo rogida xayiraadaha ayaa saameyn xoog leh ku yeelatay qaxootiga iyo**

magan galyo doonka midaas oo ka dhigeyso mid adag sida helitaanka caafimadka iyo adeegyada kale ama si ay ugu baxaan ujeedoyinka dakhli doonka ah.

Howl wadeenada sama falka waxa ay habeeyeen jawaabahooda si loo daboolo baahiyaha dag daga ah laakiin horumarka la xariira masiibada caabuqa-19 sida kororka casriga ah ayaa sidoo kale caqabad ku ah adeegyada ay helaan dadka qaxootiga iyo magangalya doonka ah.

Najiitada waxa ay tilmaameysaa inkastoo ay jiraan caqabado kala duwan oo ay la kulmaan, **qaxootiga iyo ururadooda qaxtotiga ay hogaamiyaan ayaa kaalin firfircoon ka qaato ka jawaabista dhibka safmarka**, waxa ay u gudbiyaan fariimaha xambaarsan qataraha la laxiira Caabuqa-19, sida barayaal nadaafada iyo talaabooyinka badqabka , iyo sidii bixiyayaasha agabka ka hortaga sida waji-xirka ama saabuunta iyo in bulshada si nafsiyan ah loo taageero.

Si balaaran, heerka bulshada, xogta ayaa tilmaameyso, in **musiibada ay qeyb ahaan sii adkeysay xiisasadaha qaxootiga dheddooda ah iyo kuwa u dhaxeeyo qaxootiga iyo marti dadka galiyaan**, oo ay ugu horeyso walaaca helitaanka kheyraadka, intaas waxa sii dheer in qaxootiga ay tiro wadamo ah kala kulmaan dhaqamada qaxooti nacayb ku saleysan sida in ay keenaan feyraska. **Si walba h ahaatee, jawaab bixiyayaashu waxay sheegeen in dhaqamada qaxootiga iyo hay'adaha gargaarka waqtiyada lagu jiro musiibada ay yareeyaan xasaradaha kana qeyb qaataan xaaladaha nabada.**

Draasadaan tayeysan ma tusineyso oo kali ah saameynta adag e musiibada balse sidoo kale hab dhaqanka kala duwan ee qaranka iyo kuwa deegaanka ee wax kaqabashada musiibada.

Daraasadaan ayaa la sameeyay ayadoo qeyb ka ah mashaariicda cilmi barista "Tahriibka khasabka ah, haweenk iyo nabada? Dhisida hab dhaqanka nabada ee haweenka kujira xeryaha qaxootiga" ([DSF](#) and [Osnabrück University](#)) iyo "Barakaca qasabk ah ee Afrika: Siyaasadda iyo saamilayda socdaalka" ([DSF](#) and [Arnold Bergstraesser Institute](#)). Mashaariicdaan waxa si madax banaan u maalgaliyay xarunta cilmi barista nabada ee Jarmalka (DSF). Caabuqa-19 dartiis, baarayaasha kala duwan ee mashaariicdaan ayaa go'aansaday in ay si wadajir ah ugu sameeyaan is bardardhiga fikradaha saameynta masiibada caabduqa-19 ku yeeshay qaxootiga iyo ilaalintooda.

Nadine Segadlo, Ulrike Krause, Franzisca Zanker, Hannah Edler

12 | 2021